



- Hennepin County Sheriff
- Metro Transit Police
- Minneapolis Police
- Minnesota Department of Natural Resources
- Minnesota Homeland Security and Emergency Management
- Minnesota National Guard
- Minnesota State Patrol
- Ramsey County Sheriff
- St. Paul Police

## Dedaalka Badqabidda Dadweynaha

Maxkamadeynta Sarkaalkii hore ee Booliska Minneapolis, Derek Chauvin, ayaa la filayaa in ay soo jiidato dadweynaha oo xamaasad u haya iyo warbaahinta. Xamaasaddaas waa ay sii kordhi kartaa inta ay socoto maxkamadeynta oo garnaqsiga dacwadda ka dhigeysa mid si toos ah looga daawado adduunka oo dhan.

Marka la isu diyaarinayo arrintan oo ah mid weyn, hay'adaha badqabidda dadweynaha ee heer gobol, ilaa dalka oo dhan, iyo dawladaha hoose waxay si wadajir ah uga shaqeynayaan sidii loo xaqiijin lahaa amniga dadka Minnesota, haddii ay ahaan lahayd guryahooda, shaqadooda, ama bannaannada, goobaha ay dadku ku muujinayaan xuquuqdooda Koowaad ee Sharciga ah ee mudaaharaadka nabdoon.

Dedaalka oo laga wada shaqeynayo waxaa lagu ilaalinayaa amniga dadweynaha Minnesota oo waa barnaamij ay hay'adaha ka shaqeeya badqabidda dadka ku magacaabeen Dalladda Hawlgalka Badqabidda.

### **Waa maxay Dalladda Hawlgalka Badqabidda?**

Dalladda Hawlgalka Badqabidda waa dedaal laga wada shaqeynayo si loogu xaqiijiyo amniga dadweynaha inta ay socoto maxkamadeynta Derek Chauvin. Ururrada ka qeybgalaya Dalladda Hawlgalka Badqabidda waxaa ka go'an ilaalinta dadka, hantida, iyo xorriyadda hadalka.

### **Maxay muhiim u tahay Dalladda Hawlgalka Badqabidda?**

Maxkamdeyntu waa dan guud oo muhiim u ah inay dadka isku yimaada xuquuqdooda ayey xor u yihiin, hase yeeshee hay'adaha badqabidda waxay samaynayaan qorshayaal ay ku ilaalinayaan dadka balse waa in ay ka jawaabaan caqabadaha ay kala kulmaan. Dalka oo dhan iyo gobolka Minnesota, kooxo aan wax rabshad ah u socon ayaa waxaa ku soo dhex dhuumanaya shakhsiyaad ah qaswadeyaal. Dalladda Hawlgalka Badqabidda waxaa loo sameeyey si la isugu diyaariyo oo loo fududeeyo Xuquuqdooda Koowaad ee hadalka balse waxa sidoo kale la ilaalinayo waa dadka iyo hantida shakhsiga ah ee ay qaswadeyaashu rabaan inay waxyeello u geystaan.

### **Yaa hoggaaminaya Dalladda Hawlgalka Badqabidda?**

Waa dedaal wadajir ah oo u dhexeeya Magaalada Minneapolis, Degmada Hennepin, iyo Gobolka Minnesota, iyo sidoo kale ciidanka Metro Transit, Degmada Ramsey, iyo waaxyaha kale ee amniga deegaanka. Hay'adaha qeybta ka ah dedaalka waxaa ka mid ah: Booliska Minneapolis, Booliska Metro Transit, Xafiiska Shariifka Degmada Hennepin, Xafiiska Shariifka Degmada Ramsey, Ciidanka Amniga Jidweyneyaasha Minnesota, Ciidanka Keydka ah ee Minnesota, iyo hay'ado kale.

Hay'adahaas waxa ay ku shaqeyn doonaan amar mideysan si ay u u hagaajiyaan adeegyada iyo waxqabadka. Amarka mideysan waxaa loola jeedaa mid ay soo wada saareen hay'adaha ku lugta leh go'aamada hawlgalka.

Magaalada Saint Paul waxay horseed u tahay dedaal qorsheysan oo barbar socda oo ay qeyb ka yihiin Kooxda Waxqabadka East Metro, oo waxaa ka mid ah Xafiiska Shariifka Degmada Ramsey, Xafiiska Shariifka Degmada Washington, Xafiiska Shariifka Degmada Dakota, Ciidanka Amniga Jidweyneyaasha, Ciidanka Keydka ah ee Minnesota iyo hay'ado kale. Dalladda Hawlgalka Badqabidda iyo Kooxda Waxqabadka ee East Metro waxay si dhow uga wada shaqeynayaan sidii loo xaqiijiyo waxqabadka mideysan.

### **Maxay filan karaan dadka Minnesota in ay arkaan?**

Inta ay maxkamaddu socoto, Minneapolis, Saint Paul iyo deegaanka nawaaxiga ah waxaa lagu arki doonaa agab kala duwan, xayndaabyo, jidgooyo, xakameynta gaadiidka, Baabuurta Ciidanka Keydka, iyo diyaarado qumaati u kaca. Waxaa dhici karta in si ku meel gaar ah loo xiro jidadka, meelaha baabuurta la dhigto, iyo goobo kale.

### **Maxay tahay sababta loo adkeynayo amniga?**

Kooxo qaswadeyaal ah ayaa helaya fursad ay carqalad ku sameeyaan. Hanjabaad ayey sameeyaan dadkaas xagjir ah oo waxay rabaan inay rabshad ku furaan maxkamadda ama ay waxyeello geystaan. Amniga oo la adkeeyo wuxuu muhiim u yahay si loo hubiyo in aysan maxkamaddu dhib la kulmin iyo si ay dadku badqabid u helaan.

### **Heerkan la soo qorsheeyay ee amniga sababtiisu ma waxay tahay inay jiraan dad aan ku qanaci doonin xukunka dhinac kasta oo uu dhaco?**

Amniga dadweynaha in uu sugan yahay inta ay dhammaaneyso maxkameynta waa wax muhiim ah, si loo habsado iyo si ay waaxda garsoorku u qabsato shaqadeeda. Maxkamadda, xeer-ilaaliyeyaasha, iyo qareennada difaaca ayaa ka doodi doona kiiskan, oo ugu dambeyn garsooreyaasha dadweynaha ayaa gaari doona go'aanka eedaysanaha oo noqonaya dambiile ama dambi-laawe. In la hubiyo maxkamadeyntu in ay ku dhacdo si nabadgalyo ah oo aysan kala go'in waa wax qeyb ka ah in la sugo caddaaladda.

### **Hay'ado kale ama dowladda dhexe miyaa ku leh hawlgalkan?**

Haa, waxaa jira hay'ado kale oo qeyb ka ah in la iska caawiyo nawaaxiga labada magaalo iyo gobolka oo dhan iyadoo la raacayo talis midaysan si looga wada shaqeeyo waxqabadka.

### **Waa maxay doorka ay leeyihiin Ciidanka Keydka?**

Mar ay codsi direen Madaxda magaalada ugu sarreysa ee Carter iyo Frey, Barasaabka gobolka, Walz ayaa u hawlgeliyay Ciidanka Keydka ee Minnesota si ay uga caawiyaan xaaladaha kala duwan ee degdegga ah ee lagu taageerayo amniga guud inta ay socoto dacwadda maxkamadda.

Marka lagu daro hawlgalka federaalka ee qaranka loogu adeegayo dibadda, Ciidanka Keydka ah ee Minnesota waxa kale oo ay caawiyaan hawlgallo ka dhacaya Minnesota. Sannadkii la soo dhaafay, Ciidanku waxay door muhiim ah ka ciyaareen taageeridda Gobolka Minnesota, sida hawlaha goobihii baarista ee COVID-19, caawinta goobaha daryeelka waayeelka ee xarumaha ah guryaha muddada dheer, mar uu shaqaale aad u tiro badan ku dhacay COVID-19, in gobolka lagu caawiyo dedaalka tallaalka COVID-19, iyo in la caawiyo ilaalinta dadweynaha Minnesota inta lagu jiro xilliyada adag ee ay ka mid yihiin kacdoonka shacabka, daadadka xilliga roobka, iyo duufaannada khatarta badan ee xilliga qaboobaha.

### **Ururrada ka qeyb galaya Dalladda Hawlgalka Badqabidda waxay rabaan in ay dadka Minnesota u kala caddeeyaan waxyaabaha loo oggol yahay ee sharciga ah, iyo waxyaabaha aan sharciga ahayn.**

#### **Waxyaabaha Sharciga ah**

- Isu-imaatin Xasilloon
- Mudaaharaad (aan la aadeyn jidweyne)
- In dadku muujiyaan codkooda
- Isticmaalidda xuquuqda dastuurka
- Joogidda goobaha dadweynaha
- Boorar aan cay ku qorneyn iyo muujinta amniga
- Isu-imaatinka oo ka dhaca meelaha la isugu talagalay

#### **Waxyaabaha Sharci-darrada ah**

- Mudaaharaadka lugta lagu galayo jidweynaha baabuurta
- Rabshadaha Tuuryada ah
- Dab in la shido nooc uu ahaado
- Waxyeelleynta hantida ama sawir-gacmeedka darbiyada
- Isticmaalidda buluuleyr ah sharci-darro
- Soo-qaadashada ama adeegsiga hub sharci-darro ah
- Baabuur-wadid qeyrul-masuulnimo ah, gaar ahaan goobaha dadku ku lugeynayo